

Garsooridda & Tartannada 2023-2024

Mudane/Marwo Waalid ama Mas'uul –

History Day ardaydu waxay haystaan ikhtiyaarka ah inay galiyaan mashruucoda tartannada. Waxa jira heerar kala duwan oo tartanno ah laga soo bilaabo dugsiga ilaa qaranka. Tartannadu waa hab ay ardaydu ula wadaagaan mashruucyadooda garsoorayaasha, dadka ay isku facca yihiin, iyo bulshada. **Waalidiinta iyo qoysaska ayaa si xoog leh loogu diiri galinayaa in ay ka soo qayb galaan!**

Waxa jira afar heer oo tartan ah. Kala hadal macalinkaaga wixii macluumaad dheeraada ah.

- **Dugsi** – Macalimiinta ayaa doorta taariikhaha dhacdada iskuulka
- **Goboleed**– 12 dhacdooyin Goboleed ayaa dhaca bisha Maarso dhexdeeda. Kala hadal macalinkaaga taariikhda.
- **Dawlad Goboleed** – Maajo 4, 2024, Jaamacadda Minnesota - Twin Cities
- **Qaran**- Yuunyo 2024, College Park, Maryland

Garsoorayaashu waxay waraysi la yeeshaan ardayda, waxay bixiyaan jawaab-celin qoran, waxayna doortaan kuwa la galinayo si loo horumariyo. Garsoorayaashu waxay ku shaqeeyaan iska wax u qabso. Waxay ka yimaadaan bulshada, waxbarashada sare, iyo shirkadaha Minnesota dhexdeeda. Garsoorayaashu waxay waydiin doonaan su'aalo ku saabsan cilmi baadhista iyo mashruuca. Su'aaluhu way kala duwanaan doonaan, laakin waxaa ku jiri **kara**:

- *Sidee ayaad u dooratay mawduucaaga?*
- *Maxay ahayd xigashadii ugu waxtarka lahayd sababtuna maxay ahayd?*
- *Maxaa uu ahaa doorkii xubin kasta oo kooxda ka mid ahi ay ka ciyaartay horumarinta galinta?*
- *Maxaa uu ahaa wixii ugu muhiimsanaa ee aad baratay intii lagu gudo jiray History Day?*
- *Maxaa ay samaysay xubin kasta oo kooxda ka mid ahi si ay u caawiso curiso mashruuca?*

Garsoorayaashu waxay isla shuruudaha ku isticmaalaan gobolka, dawlad goboleedka, iyo heerar ka qaranka:

- Tayada Taariikhda (80%)
- Bayaaminta Soo Bandhigista (20%)
- Xeerarka Waafaqsan

Garsoorayaashu waxay doortaan mashruucyada si ay ugu horumariyaan heerkasta xiga tartan kasta. Tirada mashruucyada horusocodka lihi waxay ku xidhan yihiin inta arday ee tartamaya. Guud ahaan, ugu yaraan saddex mashruuc qaybtiiba ayaa ku habboon in ay hore u socdaan.

Sidee ayaad u caawin kartaa?

- **Ka hadal** muhiimada uu leeyahay waxay soo barten, maaha oo kaliyaata inay ku guulaystaan billad.
- **Raaxo** gali ardaygaaga. Waxaad tahay taageerahooda ugu wanaagsan ee dajin kara neerfahooda.
- **waydii** macalimiinta waxa ku saabsan faahfahinta dhacdada.
- **Ku dhamaystir** sahamada waalidka tartamada dhexdooda. Jawaab-celintaada waxay naga caawineysaa in aanu hagaajino barnaamijka ardayda kale.

Waad ku mahadsantahay taageerada aad taageerayso ardaygaaga marka ay curinayaan mashruuc History Day ah! Waxaad History Day wax badan ka baran kartaa boggayaga internet-ka, www.mnhs.org/historyday/contests-and-judging.

Sammi Jo Papas

Sammi Jo Papas
Maamulaha Barnaamijka iyo Isuduwaha dawlad goboleedka
National History Day in Minnesota
samantha.papas@mnhs.org